Sookoobista Cilmi-baarista Nidaamka Ku Saleysan Xaqsoorka Caafimaadka

Ka Dhaafida Shuruudaha Cilmi-baaris ee 1115

Sookoobista Codsiga

Gobolka Oregon wuxuu codsan doonaa in laga dhaafo shuruucaha hay'adaha CMS si loo dhiso nidaam salka ku haya caafimaadka iyadoo la hagaajinayo kala-guurka nidaamyada oo dhan, yareynta firaaqa caymiska iyo daryeelka, iyo bixinta xirmooyinka qeexan ee adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay baahiyaha bulsheed ee la xiriira caafimaadka kuwaasoo la xiriira kala-guurka.

Dhibaatada iyo Araarta

Mid ka mid ah xaaladaha ugu adag oo aan sugneyn ee xubinta barnaamijka OHP ay tahay inuu maro waa xilliyada lagu jiro kala-guurka la taaban karo, kaasoo laga yaabo inay noqdaan kuwa aan u-qalmin sababo la xiriira, in lagu xiray, laga soo daayay goob hay'adeed bilaa guri la'aan, ama haddii kale hoy-laawe yahay ama ay la soo gudboonaatay sugnaan la'aan guriyeed, ama maray dhacdooyin nololeed oo la taaban karo oo khalkhal gelin kara xasiloonida, gaar ahaan dhanka caafimaadka habdhaqanka (tus., ka gelida/ka bixida daryeelka korrinka ama keenista guriga ilmo cusub), ama kalagoys kasta oo ka mid ah kala-guuradaas. Ugu dambeyntiina, xubnuhu inta badan waxaa loo daayaa inay si madax-bannaan u raadiyaan nidaamyo badan oo isku-dhafan sababtoo ah nidaamkayaga daryeelka caafimaadka ee gobolka looma qaabeynin inuu waafaqo iyo la jaanqaado nidaamyada kale ee bulshada iyo bixiyeyaasha qaab u oggolaanaya qof walba inuu si wadajir ah u yimaado si uu uga taageero dadka inay helaan nidaamyo aan dhib lahayn. Caqabadahaan waxaa ka sii daray xubnaha qabaa'ilka, bulshooyinka midabka leh, iyo dadka naafada ah maadaama nidaamyadu badanaa aysan lahayn kaabeyaal iyo ilo dhaqaale si loo bixiyo daryeel iyo adeegyo dhaqan ahaan iyo luqad ahaan habboon oo inta badan ku qaabilin dadka halka ay joogaan.

Tusaale ahaan, inkastoo guul weyn ay ka gaartay Oregon ka diiwaangelinta boqolaal kun oo qaangaar ah barnaamijka OHP sida ku cad ku ballaarinta Medicaid gobolka, dadka caddaaladda ku lugta leh waxay ka wajahaan caqabado adag diiwaangelinta marka laga sii daayo xabsiga. Tani waa mid si gaar ah walaac looga muujinayo iyadoo ay jirto baahsanaanta sare ee cudurka raaga iyo la kala qaado, iyo cudurrada dhimirka ee aan la daaweyn iyo cilladaha balwadaha ee soo food saara dadkan. Ka gaabinta siinta xiriirinta caymiska caafimaadka iyo adeegyada daryeelka caafimaadka maxaabiista kala-guurka maraysa ayaa saameyn weyn ku yeelata heerarka dib ugu noqosho iyo sare u kaca kharashaadka daryeelka caafimaad ee isbeddellada caafimaad looga golleeyahay in lagula dagaallamo. Oo dhallinyarada iyo dadka waaweyn labaduba, dadka midabka leh aad ayay ugu badanyihiin dadka u xiran gobolka Oregon sababo la xiriira dulmiga taariikhi ah iyo cunsuriyadda nidaamsan. Gudaha Oregon, ragga iyo dadka midabka leh ayaa si aan kala sooc lahayn loo xiraa marka lala barbardhigo tirooyinka kooxaha kale. Heerka dhallinyarada xiran ayaa 6 jeer ku badan Afrikaan Ameerikaanka marka lala barbardhigo dhallinyarada caddaanka ah.

Heerka dhallinyarada xiran ee 100,000-kii kun ee qof jinsiyad/qowmiyad ahaan: Oregon, Janaayo 2018



Fiiro gaar ah: Dhammaan jinsiyadaha kale ee aad aragtay waa laga reebay qowmiyadaha Hisbaanik. Qiimooyinka kooxyada kale lama heli karo.
Xigasho: Maamulka Dhalinyarada Oregon

Isxigxiga kala duwanaansho jinsiyad/qowmiyad ahaan ayaa aad isugu eg isla xabsiga gobolka Oregon iyo dadka ku jira xabsiga.

Tirada dadka ku jira jeelka iyo xabsiga jinsiyad/qowmiyad ahaan 100,000-kii qofba: Oregon 2018



Fiiro gaar ah: Dhammaan jinsiyadaha kale ee aad aragtay waa laga reebay qowmiyadaha Hisbaanik.
Xigasho: Xafiiska Tirikoobka Cadaalada (jeelasha) iyo Waaxda Asluubta Oregon (xabsiyada)

Dadku waxay u baahan yihiin taageerooyin ka baxsan nidaamka daryeelka caafimaadka si ay ugu guuleystaan marxaladan kala-guurka ah. Tobbankii sanno ee la soo dhaafay waxaa cadaatay in adeegyada caafimaadka keligood aysan wax ka qaban karin xaaladaha caafimaad iyadoo aan sidoo kale la hubinin baahiyaha bulsheed ee muhiimka ah sida guriyeynta, cuntada, iyo baahiyaha kale ee aasaasiga ah. Inkastoo adeegyada daryeelka caafimaadka ee tayada leh oo waqtiyeysan ay muhiim yihiin, cilmi-baarista ayaa muujinaysa in xaaladda dhaqan-dhaqaale ee qofka, habdhaqannada, iyo bay'adda ay yihiin kuwa ugu horreeya ee dardargeliya caafimaadka, iyagoo ku deeqa ilaa iyo 80 boqolkiiba natiijooyinka caafimaadka. Si loo hubiyo in daryeelka caafimaad uu wax-ku-ool u noqon karo wax ka qabashada jirrada iyo ugu dambeyn dhiirrigelinta caafimaadka, nidaamku wuxuu u baahan yahay inuu daaweeyo qofka oo dhan.

Dadka ku dhibaateysan sugnaan la'aanta guryaha, tani waxay uga dhigan tahay isku-darka raadinta guriyeynta, isku xirka daryeelka iyo kheyraadka si gacan looga geysto helitaanka iyo dayactirka guryo sugan oo caafimaad leh oo loogu talagalay shakhsiyaadka iyo qoysaskooda/guryahooda mar kasta oo ay suurtagal tahay. Tan waxaa ka mid noqon kara in diiradda la saaro bixinta adeegyo dhaqan ahaan iyo luqad ahaan habboon iyo adeegyada wargalka ah ee naxdinta ee loogu talagalay bulshooyinka qabaa'ilka ah, bulshooyinka midabka leh, iyo bulshada naafada ah,1 kuwaasoo taariikh ahaan oo hadda si buuxda looga qeybgelin oo si buuxda uusan ugu adeegin nidaamka daryeelka caafimaadka isla markaana si aan dheelitirneyn uga mid ah tirakoobka hoy la'aanta. Tani waxay sidoo kale ka mid tahay baahida loo qabo in si gaar ah diiradda loo saaro wanaajinta isku xirka daryeelka iyo hubinta sii wadida caymiska xilliga kala-guurada oo dhan ee loogu talagalay xubnaha caafimaad ahaan iyo bulsho ahaan aadka ugu daran ee nidaamka caafimaadka habdhaqanka, gaar ahaan marka laga hadlayo bixiyeyaasha dhaqan ahaan jawaab-celinta leh.

Himilada, Hadafyada iyo Geedi-socodka:

Himilada: Gobolka Oregon wuxuu dejiyaa nidaam salka ku haya xaqsoor caafimaad kaasoo hubiyo in dadku ay helaan adeegyada iyo taageerooyinka ay u baahan yihiin (daryeelka caafimaad ama si kale haddii loo dhigo) si loo gaaro caafimaad iyo fayoqab wanaagsan, gaar ahaan xilliyada kala-guurka.

"**Nidaamka caafimaad ee salka ku haya xaqsoorka**" waa fikrad ugub ah oo lagu dhisayo daryeelka qofka lagu saleeyay[1] iyadoo la aqoonsan yahay in shaqsiyaadku aysan si buuxda ula wareegi karin caafimaadkooda iyo khibradooda daryeel marka nidaamku door weyn ka ciyaarayo qaabeynta deegaanka, oo ay ku jiraan xulashooyinka ama xulashooyin la'aanta loo soo bandhigay qofka.

Ka shaqeynta nidaam salka ku haya xaqsoorka caqabadaha caafimaadka ee qobolkeenu wajahayo si loo hubiyo in nidaamka bixinaya adeegyada caafimaadka uu abuuro jawi dadka ay ku heli karaan caafimaadka iyo fayoqabka ugu sareeya oo aan lagu heyb sooceyn jinsiyadooda, qowmiyadooda, luuqadooda, curyaannimadooda, jinsigooda, aqoonsigooda jinsiyeed, dooqooda galmo, heerkooda bulsheed, isdhexgalka bulshooyinkaan ama heybahaan, ama xaaladaha kale ee bulshada ay go'aamiso.

Sida lagu qeexay qeexitaanka xaqsoorka caafimaadka ee lagu qaatay Oregon[1], gaarista tani waxay u baahan tahay wadashaqeyn ka socota dhammaan gobollada iyo qeybaha gobolka, oo ay ku jiraan dawladda qabiilka si wax looga qabto:

- Baahinta simman ama dib u qeybinta kheyraadka iyo awoodda; iyo
- Aqoonsashada, dib u heshiisiinta iyo saxitaanka taariiqda iyo cadaala darada casriga ah.

Hadafyada

- Kor u qaadida isku xirka daryeelka iyo taageerooyinka aan daaweynta ahayn ee xubnaha ka gudbaya dhammaan nidaamyada si loo wanaajiyo natiijooyinka, oo ay ku jiraan dabacsanaanta ku xeeran u-qalmida iyo caymiska.
- Ka saarida caqabadaha helitaanka adeegyada caafimaadka ee muhiimka ah, dhaqan ahaan, iyo luuqad ahaan ku habboon xubnaha OHP.
- Siinta ahmiyad kooxaha dadka ee hadda la wajahaya xaqsoor la'aanta si barnaamijka Medicaid ee gobolka Oregon uu u gaaro xaqsoorka nidaamkiisa caafimaad.

Geedi-socodka iyo Istaraatijiyadaha Suurtogalka ah ee Lagu Gaarayo Hadafka

Tallaabooyinka hoose waxay tilmaamayaan geedi-socodka loo baahan yahay si loo gaaro hadafyada. Aqoonsashada fursadaha lagu kordhinayo caymiska Medicaid, ka diiwaangelinta xubnaha CCO, ugu dambayntiina ku xirista adeegyada loo baahan yahay ayaa udub dhexaad u ah carqaladeynta iyo yareynta soo noqnoqoshada dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka, hoy la'aanta, xirida, iyo dib ugu noqoshada. Saameynada dhaqaale waxay u lahaan karaan saameyn badan oo wanaagsan oo aan ku koobneyn oo keliya Medicaid, balse nidaamka fulinta sharciga iyo xabsiga, jeelasha degmada, gobolka, iyo kharashaadka ku baxa xabsiyada, iwm.

Tallaabada 1-aad. Aqoonsashada kala-guurka sugneyn ee sida ugu fiican loogu wanaajin karo si kumeelgaar ah, isku xirka daryeelka ee la xoojiyay iyo maaraynta kiiska.

Kaqeybalka dadweynaha, wada-hawlgaleyaasha iyo daneeyeyaasha ayaa muujisay in xilliyada kala-guur ee soo socda ay yihiin kuwa ugu carqalada badan xubnaha isla markaana qiimo badan ugu fadhin kara nidaamka. Kala-guuradaan ayaa si gaar ah u dhib badan sababo la xiriira halisyada ka dhalan kara ee xubinta wajihi karo haddii ay lumiyaan caymiska ama daryeelka inta uu la tacaalayo xaaladaha raaga ee aan la maareyn, caqabadaha caafimaadka habdhaqanka ama arrimaha bulshada. Siinta ahmiyad kala-guurka lafttiisa ayaa oggolaanaya taageerooyin iyo adeegyo la xoojiyay oo loogu talagalay xubnaha laga yaabo inaan la ogaan oo sida kale ka hoos bixi kara firaaqa. OHA waxay la shaqeyn doontaa la-hawlgalayaasha si ay u sii wado turxaan bixinta liistada kala-guurka ee xubnuhu wajahayaan

Xaaladaha rabi doona Taageerada Kala-guur ee Isku Xiran:

- Gelida ama ka bixida nidaamka xabsiyada, oo ay ku jiraan kuwa ku yaala xarumaha dhallinyarada
- Ka bixida joogista isbitaalka daryeelka degdega ah iyadoo ay jirto sugnaan la'aan guriyeed ama dadka hoy la'aanta ah
- Gelida ama ka bixida goobaha daaweynta dhimirka ee la dego, oo ay ku jiraan dhallinyarada isha ku haya adeegyada loogu talagalay shaqsiga iyo baahiyaha caafimaadka bulsheed la xiriira ee muhiimka u ah xasilinta guuleysato.
- Gelida/ka bixida guryaha daryeelka korrinta, oo ay ku jiraan da' weyn ku gaara daryeelka korrinta
- Gelida xilliga umusha kadib dhalashada (dhallaanka iyo qoyska)
- Ka-hortagga dhibaatada caafimaadka dhimirka ee soo food leh ama ka soo kabashada dhibaatada caafimaadka maskaxda

Tallaabada 2-aad. Qeexida xirmada Taageerada Kala-guur ee Isku Xiran ee adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay mid kasta oo ka mid ah kala-guurka la aqoonsaday.

Maamulka ka-dhaafida shuruudaha ayaa oggolaan karta qaabdhismeedyo cusub oo loogu talagalay nidaamka Medicaid oo sahlaya ciribtirka xaqsoor la'aanta caafimaadka iyadoo diiradda la saarayo “beddelka adeegyada” (ILOS) adeegsiga adeegyo kale iyo adeegyada bulsheed ee wax looga qabto baahiyaha bulshada ee la xiriira caafimaadka. Adeegsiga ILOS wuxuu gacan ka geystaa kordhinta maalgelinta bulshada iyo ka saarista caqabadaha qoddobada dhaqan ahaan kala gooya wada-hawlgaleyaasha iyo CBO-yada, iyadoo la dhiirrigelinayo helitaanka adeegyada la dardargeliyay ee sida dhow u daboola baahiyaha xubinta.

OHA waxay la shaqeyn doontaa CMS, wada-hawlgaleyaasha iyo daneeyeyaasha si loo go'aamiyo taageerooyinka iyo adeegyada gaarka ah ee lagu dari doono Taageerada Kala-guur ee Isku Xiran ee loogu talagalay kala-guur kasta oo muhiim ah, oo ay ku jiraan aqoonsashada arrinta dhalisay, u-qalmida iyo istaraatiijiyadda dhaqaale ee habboon. Xirmooyinkaan waa isku-dhafka adeegyo caafimaad iyo kuwa aan caafimaadka ahayn ee lagu taliyay waxaana ku jiri doona adeegyada sida:

- Baahiyaha bulsho ee la xiriira caafimaadka (tus., kordhinta adeegyada loogu talagalay shaqsiga iyo adeegyada guriyeynta ee la taageero si loo hubiyo in xubnuhu awoodaan inay helaan oo dayactirtaan guryaha marka wax laga qabanayo baahiyahooda aasaasiga ah ee caafimaadka iyo adeegga.)
- Adeegyada daryeelka isku xiran (tus., taageerida kala wareegida diirran ee nidaamyada oo dhan, adeegyada taageero ee ka horreeya oggaanshaha cudurka/adeegyada hore hawsha kaqaybgelinta, daaweynta kahor)
- Taageerooyinka nidaamka raadinta (tus., raadinta guryaha, raadinta daryeelka ilmaha)
- Caymiska la dheereeyay (tus., 30 maalmood caymiska barnaamijka OHP kahor inta aan laga sii deyn xarumaha Waaxda Asluubta ee ku yaala gobolka Oregon)
- Adeegyada caafimaad oo gaarka ah ee lagu taliyay (tus., daaweynta kooxaha dadka ee kala-guurka daryeelka korrinta)
- Helitaanka sida gaarka ah lagula taliyay bixiyeyaasha (tus., adeegyada asaaga la gaarsiiyo, shaqaalaha caafimaadka bulshada)

Tallaabada 3-aad. Wanaajinta nidaamka caafimaadka habdhaqanka si loogu taageerto si fiican xubnaha, gaar ahaan waqtiyada kala-guurka, iyo bilowga ilaa dhammaadka nolosha.

Qorshaha Caafimaadka Oregon waxaa lagu bixiyaa xirmo macaashka caafimaadka ah oo loogu talagalay adeegyada caafimaadka habdhaqanka; si kastaba ha noqotee, gobolka Oregon wuxuu la kulmaa caqabado dhowr ah oo ku saleysan awoodda uu u leeyahay caafimaadka habdhaqanka, shaqaalaha iyo helitaanka. Awoodda iyo shaqaalaha ayaa la wajahayaa iyadoo laga shaqeynayo maalgelinta lacagaha gobolka si loo xoojiyo arrimahaas. Maalgashigaas ayaa gacan ka geysan doona helitaanka adeegyada iyagoo ka dhigayo kuwo la heli karo waxayna diiradda saari doonaan hubinta bixiyeyaal dhaqan ahaan jawaab-celin leh iyo ku hadla luuqad habboonoo ay heli karaan xubnaha. Si kastaba ha noqotee, si buuxda si loogu gaaro heerka helitaanka adeegyada Oregon waxay doonaysaa, isbeddelo muhiim ah in lagu sameeyo nidaamka Medicaid iyadoo loo marayo maamulka ka-dhaafida shuruudaha.

Carruurta, isbeddeladaan waxay ugu leeyihiin siinta ahmiyad wanaajinta ka helitaanka daryeelka caafimaadka habdhaqanka ee gobolka oo dhan iyadoo la waasicinayo ama la ballaarinayo caymiska, la hubinyo helida heerka habboon ee daryeelka, iyo laga hortagayo ku lug lahaanshaha nidaamyada badan iyadoo meesha laga saarayo ceebeynta oo caadi laga dhigayo helitaanka daryeelka guud.

Dadka waayeelka ah tani waxaa ugu jira isdhexgelinta fiican ee niyadjabka, isdilka iyo dhaqamada baaritaanka dheefshiidka ee dadka waaweyn ee qaba xaaladaha caafimaadka habdhaqanka ee gaboobaya iyagoo ku jira nidaamka, oo inta badan wajahayaan kala-guurka daryeelka u gaarka ah dadkan.

Tani waxaa ka mid ah fursadaha lagu casriyeynayo nidaamka dhibaatada caafimaadka habdhaqanka iyo in la kordhiyo isticmaalka adeegyada asaaga ku saleysan iyo shaqooyinka caafimaadka bulshada. Tani waxay sidoo kale ballaarin doontaa fursadaha looga faa'iideysan karo daaweynta dhaqan ahaan gaarka ah oo ku saleysan takhasuska ee ixtiraamka u haya dadka loo adeegayo.

Tallaabada 4-aad. Hubinta in bixiyeyaasha iyo ka wada-hawlgaleyaasha goobaha aan caafimaadka ahayn ay haystaan kaabeyaal, tababarka iyo taageerada lagama maarmaanka u ah kaga qaybqaadashada la-hawgale daryeel ahaan ee xubnaha.

Si loo bixiyo daryeelka buuxa ee qofka loogu talagalay, isku xirka iyo iskaashiga lagula yeesho bixiyeyaasha iyo wada-hawlgaleyaasha goobaha aan caafimaadka ahayn waxay u baahan doonaan maalgashiga kaabeyaasha isku xiraya Medicaid iyo bixiyeyaasha adeegga bulshada iyo sidoo kale adeegyada aan caafimaadka ahayn oo xadidan. Tani waxay si dhow xiriir ula leedahay fursadaha lagu soo bandhigay istaraatiijiyadaha cusub “beddelka adeegyada”, iyo xoojinta rajooyinka laga qabo taageerooyinka bulsheed ee lagu taliyay iyo taageerada caafimaadka habdhaqanka ee xubnaha ku jira ICC.

Tallaabada 5-aad: Wanaajinta hawlaha baaritaanka si loo hubiyo in dadka ku howlan nidaamyada badan loo aqoonsado inay helaan taageerooyinkan isku xiran ee kor loo qaaday ayna u helaan daryeelka ay u baahan yihiin.

CCO-yada way bislaadeen waxayna hadda leeyihiin kooxaha maareynta kiisaska culus/kooxaha isku darka daryeelka degdega ah (ICC) oo si ifiican loo dhisay si ay uga jawaabaan baahiyaha xubinta barnaamijka OHP ee la xiriira caafimaadka jirka, caafimaadka habdhaqanka iyo ku xadgudubka mukhaadaraadka/qiimeynta/daaweynta, baahiyaha ilkaha iyo NEMT wixii gaadiidka adeegyada Medicaid ah iyo siyaasadaha Adeegyada La Xiriira Caafimaadka ee adeegyadaas ama sheeyaaashaan oo aan dib loo bixinin ee ku xiran natiijooyinka caafimaadka. Si kastaba ha noqotee, shakhsiyaadka laga yaabo inay xitaab aahi weyn u qabaan macaashyada oo dhan waxay noqon karaan kuwo “ka baxsan” meelaha uu gaari karo CCO-ga. Dhammaan macaashyada CCO-ga waxaa lagu saadaaliyay gudaha u-qalmida OHP, diiwaangelinta iyo khidmadda iyo shaqada xigta ee CCO-ga ee ka jirta aagga uu deggan yahay.

Si gobolku u hubiyo isku darka daryeelka (mab’da’a weyn ee CCO-yada), waxaa lagama maarmaan ah in la ballaariyo farsamooyinka la adeegsado si loo baaro isku darka daryeelka iyo ICC.

Siyaasadaha iyo Istaraatijiyadaha:

Sookoobista Cilmi-baarista waxay qeexaysaa sida maamulka ka-dhaafida shuruudaha u oggolaan karaan qaab-dhismeedyo cusub oo ku jira nidaamka Medicaid kuwaasoo sahlaya in meesha laga saaro xaqsoor la'aanta caafimaadka iyadoo diiradda la saarayo waxyaabaha la xiriira adeegyada loo isticmaalo beddel ahaan/adeegyacda ku saleysan bulshada si loo fududeeyo ka gudubyada daryeelka goobaha hay'adeed, sida jeelasha, xabsiyada, iyo IMD-yada, iyo helitaanka wanaagsan ee caafimaadka la xiriira iyo adeegyada SDOH. Si tan loo sameeyo, gobolka Oregon wuxuu codsan doonaa in laga dhaafo shuruudaha dhaqameed ee la xiriira shuruudaha u-qalmida adeegyada iyo lacagaha ee ku saleysan caafimaadka. Kuwani waxaa sida kale kaabi doona shuruudaha bulshada ee go'aaminta ku saleysan, sida hoy la'aanta, iyo ku lug lahaanshaha la kordhiyay ee nidaamyada badan ama heerarka daryeel, kuwaasoo kicin kara isticmaalka adeegyada daryeel ee isku xiran

ee adeegsada ururada bulsheed, marka ay muhiim tahay bixinta daryeelka ku saleysan xaqsoor beddelka ama marka loo geeyo ururada caafimaadka.

Istaraatijiyadaha ka-dhaafida la soojeediyay

Ka-dhaafida shuruudaha dhaqameed ee adeegsiga shurruudda ku saleysan caafimaadka ee adeegyada qaarkood iyo lacag-bixinnada laga leeyahay ujeeddooyinka Taageerada Kala-guur ee Isku Xiran

Gobolka Oregon wuxuu codsaday in laga dhaafo shuruudaha dhaqameed ee la xiriira shuruudaha u-qalmida adeegyada iyo lacagaha ee ku saleysan caafimaadka. Tani waxay u oggolaan doontaa gobolka Oregon inuu taageero xubnaha maraya kala-guurka qeexan si ay u helaan Taageerada Kala-guur ee Isku Xiran ee kor lagu xusay, si loo bixiyo adeegyo gaar ah iyo taageerooyin “beddelka adeegyada caafimaad” ee loogu talagalay baahiyaha bulsheed ee la xiriira caafimaadka ee dhaafsan heerarka, adeegyada dib looga bixin karo magdhow.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Xubnaha barnaamijka OHP ee wajaha xaaladaha qaarkood ama gelida iyo ka bixida nidaamyada kala duwan waxay arki doonaan taageerooyin iyo isku xir la xoojiyay inta lagu gudajiro xilliga kala-guurka. Taageerooyinkaas waa la sii qeexi doonaa waxaana ku jiri doona labadaba taakulayn ee caafimaadka, sida helitaanka shaqooyinka caafimaadka habdhaqanka, iyo sidoo kale waxyaabaha si weyn u taageera natiijooyinka caafimaadka qofka balse aan caadi ahaan loo tixgelin inay yihiin daryeel caafimaad (tusaale ahaan, saarista caqabadaha ku gaadaaman helitaanka ama dayactirka guryaha).

Joogteynta iyo u bilaabida diiwaangelinta Medicaid shakhsiyaadka xiran, iyo sidoo kale kuwa ku jira goobaha kale ee hay'adaha, iyo qiimeynta loogu talagalay ICC

Istaraatiijiyadan waxay taageertaa laba bulsho oo kala duwan oo wajahaan caqabado iyo taxaddiyo isku mid ah.

Shakhsiyaadka xiran

Oggolaanshaha codsiyada barnaamijka OHP in la dhammaystiro ilaa 30 maalmood kahor taariikhda siideynta maxaabiista DOC iyo diiwaangelinta degdega ah ee CCO-ga mar alla marka u-qalmida la caddeeyo.

Hawlgalka qorsheysan ee gaaritaanka iyo geedi-socodka wacyigelinta ayaa horay uga dhex jiray shaqaalaha caafimaadka ee DOC iyo wada-hawlgalayaasha tijaabinta dembiilaha ee maxalliga iyo siideynta sharafeed. Si kastaba ha noqotee, ma jirto hadda suurtagalnimada daryeel isku xiran iyo maareynta kiisaska degdegga ah ee maxbuuska ay sii daayaan DOC ee Ururada Daryeel ee Isku Xiran ee aagga uu maxbuusku ku noqonayo sababo la xiriira nidaamyada hadda jira oo dib u dhaca soo jireenka ah ee tallaabooyinka U-qalmida OHP iyo khidmadda daaweynta CCO-ga.

Istaraatiijiyadan waxaa sidoo kale ku jira istaraatiijiyad hoosaad gaar ah oo lagu hagaajinayo kala-guurka iyo gaarsiinta caymiska shaqsiyaadka lagu soo oogay dembi isla markaana lagu xiray jeelasha/goobaha ciqaabeed kahor xukunka ama dadka dhammaysta xukunnada ay ku qaateen jeelasha maxalliga ah ama xarumaha ciqaabeed oo la siidaayay si ay uga mid noqdaan bulshada.

Intaa waxaa dheer, tani ayaa laga muujin doonaa carruurta, waxayna dhisi doontaa ama ilaalin doontaa caymiska barnaamijka OHP/CCO-ga ee loogu talagalay dhallinyarada ku lugta leh nidaamka dhallinta aan qaangaarin.

Shakhsiyaadka ku jira goob hay’adeed:

Istaraatiijiyadu waxay noqon doontaa in la ilaaliyo u-qalmida shakhsiyaadka ka diiwaangashan Isbitaalka Gobolka Oregon (OSH) ugu yaraan qayb ka mid ah joogitaankooda (ugu horreyn 30 maalmood kadib qaabilaada iyo/ama marka qofku uusan dib dambe ugu baahnayn heerka daryeelka OSH), CCO-yada ayaa ku lug yeelan kara muddo dheer oo waxaa mas'uuliyad dhaqaale ka saaran isku xirka kala-guurada. Intaas waxaa dheer, tani waxay yareyn kartaa culeyska guud ee maaliyadeed ee OSH ay hadda saarto miisaaniyadda OHA.

Waxa kale oo jira tiro aan kala sooc lahayn oo dad midab leh ah oo loo oggolaaday OSH. CCO-yada ayaa laga yaabaa inay si adag u shaqeeyaan si ay ugu xiraan dadka u baahan daryeelka degdeg ah adeegyada bulsheed oo uga fogaadaan inay u sii kordhiyaan ilaa heer ay u baahdaan adeegyada OSH. Tani waxay abaalmarin siin doontaa CCO-yada oo ay aad muhiim u tahay inay ka fogaadaan adeegsiga heerarka xanniban ee daryeelka sida OSH.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Xubnaha gelaya ama ka baxaya xarumaha xabbiska ama xarumaha daryeelka ee la dego ee qaarkood, tani waxay uga dhigan tahay in caymiska barnaamijka OHP la sii wadi doono ama la kordhin doono, mararka qaarkood, si loo hubiyo raadinta isku darka daryeelka inta lagu gudajiro qeyb ka mid ah waqtiga xubintu xiran yahay ama ku jiro xarun hay'adeed si looga taageero dardargelinta kala-guurka ee dib loogu soo celiyo caymiska barnaamijka OHP.

Ballaarinta U-qalmida Barnaamijka OHP ee ilmo kasta xilliga oggaanshaha baahiyaha caafimaadka habdhaqanka

Farogelinta hore ee xaaladaha caafimaadka habdhaqanka ee carruurnimo ayaa muujisay suurtagalnimada in la yareeyo saameynta nololeed ee xaaladaha caafimaadka maskaxda iyo wacyiga korrinta, is-maareynta/is-dejinta iyo soo kabashada. Haddii sida kale xaaladaha kale ee naafanimo la aqoonsado inta lagu jiro nolosha hore, taageerooyinka lagama maarmaanka u ah dugsiga, bulshada iyo guryaha qoyska ayaa si habboon loo bixin karaa. Intaas waxaa dheer, qoysasku waxay ka faa'iideystaan uga biirinta qiimeynta iyo noocyada daaweynta si la-hawlgale la ixtiraamo ahaan oo khabiir ku ah baahida ilmahooda.

Ujeeddooyinkaan awgeed, istaraatiijiyad hoosaadka ee lagu codsaday Ka-dhaafida CMS ee Shuruudaha 1115 ee Oregon waxay diiradda saarayaan codsiga in la ballaariyo U-qalmida OHP/Diiwaangelinta CCO ee loogu talagalay ilmo kasta marka la ogaanayo inuu qabo baahiyaha caafimaadka habdhaqanka. U-qalmida ilmaha kuma xirnaan doonto dakhliga waalidka ee jira ama heerka caymiska balse waa inuu ka madax-bannaan yahay arrimahaas oo loo oggolyahay inuu sii jiro tan iyo inta midkood baahida caafimaadka habdhqanka iyo/ama baahida daaweynta socota ay jirto iyo/ama qofka dhallinyarada ah laga go'aaminayo inuu ugu qalmo qaangaar ahaan (markuu weynaado nidaamka).

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

U-qalmida barnaamijka OHP iyo diiwaangelinta CCO-ga waxay xaqiijin doontaa in dhallinyaro kasta oo qabta xaaladda caafimaadka habdhaqanka ee la aqoonsaday ay si dhakhso leh u hesho qiimeynta ku saleysan caddeynta iyo helida goobta daaweynta ku habboon iyo Heerka Daryeelka (LOC) ee lagu muujiyey baahidooda, xitaa haddii dakhliga qoyskoodu sida kale ka dhigi lahaa kuwo aan u-qalmin barnaamijka OHP.

Ballaarinta u-qalmida OHP laga bilaabo dhalashada ilaa 26 sanno jirka si loo taageero caafimaadka habdhaqanka Sii Socoshada Daryeelka loogu talagalay carruurta

Gobolka Oregon wuxuu kala kulmay (sida gobolada kaleba) caqabado sidii loo dabooli lahaa baahiyaha dhallinyarada qaangaarka ah ee qaba baahiyaha caafimaadka habdhaqanka markay ka gudbayaan adeegyada carruurta (markay yihiin 18 ama 21 jir) una gudbaan adeegyada caafimaadka dadka waaweyn. Sii Socoshada

Daryeelka Oregon ee loogu talagalay carruurta u-qalma barnaamijka OHP/ka diiwaangashan CCO-ga waa nidaam adag oo dhaafsiisan waxa ay heli karaan dhallinyaradaas haysta qorshooyinka caymiska ganacsiga. Tani sidoo kale waa run marka laga gudbayo dhallinyarnimada loona gudbayo qaangaarnimada iyadoo la adeegsanayo noocyada ugu xooggan uguna adag ee ku saleysan caddeynta ee la heli karo keliya ilaa kala-guurkan. Kala-guurka guud ee sanadahaan ayaa ah dhallinyaro “ka weynaatay” daryeelka ilmaha iyo nidaamka daryeelka korrinta balse aan weli ku xasilin iskood u maareynta xaaladdooda caafimaadka habdhaqanka ama awood u leh inay dhaqaale ahaan u taageeraan baahidooda iyo daryeelkooda.

Istaraatiijiyad hoosaadkan wuxuu diiradda saarayaa ku beegista cilmiga hadda jira ee horumarinta maskaxda wuxuuna bixin doonaa adeegyada ama taageerooyinka ku habboon korritaanka loogu talagalay dhallinta da'doodu u dhexeyso 18 iyo 26 sanno jir.

Tani waxay u oggolaan doontaa carruurta iyo dhallinta inay ku sii jiraan sii socoshada jirta marka ay ka gudbayaan sannad-guuradooda 18-aad. Waxay taageeri doontaa dhimista kala-guurka aan loo baahnayn ee u dhexeeya nidaamyada iyo bixiyeyaasha. Oo, waxay wax ka qaban doontaa farqiyada waaweyn ee ka jira sii socoshada ee gacanta ka geysta dhibaatooyinka nidaamka iyo xirista qaaliga ah. U oggolaanshaha adeegyada carruurta ee hadda ay maalgeliso Medicaid in la soo dallaco laga bilaabo dhalashada ilaa 26 ayaa u oggolaan doonta dabacsanaanta CCO-yada iyo Sharciyadda Maamulka Oregon si loo sii wado bixinta adeegyada ku saleysan caddeynta ee ay heleen ilaa iyo heerkaas noloshooda ah.

Dhallinyaro badan iyo dhallinta aan qaangarin ayaa dhowaan “ka baxeen” adeegyada kadib markay ka baxeen nidaamka carruurta iyo hay'adaha u adeega carruurta (daryeelka carruurta, OYA iwm). Dib ugama aysan soo laaban BH maxaa yeelay nidaamka dadka waaweyn ayaa aad uga duwan oo inta badan wax ka qaban baahiyaha iyadoo laga fiirinayo dhanka korritaanka habboon (tus., dhallinta aan qaangaarin). Qaar badan oo ka mid ah carruurtaan iyo dhallinyaradaan waxay ka soo jeedaan bulshooyinka midabka leh, LGBTQAI +, xubno ka tirsan Qabiilada Oregon waxayna wajaheen hoy la'aan, IDD ama saboolnimo.

Ugu dambeyntiina, joogteynta u-qalmida barnaamijka OHP/Diiwaangelinta CCO ee loogu talagalay dadkan waxay u abuureysaa ama ilaalinaysaa xasilinta dhalinyarada qaangaarka ahayn waxayna leedahay saameyn fog oo xagga nidaamka ah marka la eego dhimista kharashka iyo ka-faa'iideysiga iskaashiyada ka jira heerka nidaamka bulshada (fulinta sharciga, xabiska, waxbarashada, guriyeynta, iwm)).

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Dhallinyarada qaangaarka ah ee qabta baahiyaha caafimaadka habdhaqanka waxay sii wadi karaan helitaanka caymiska barnaamijka OHP si looga taageero isku xirka daryeelka iyo adeegyada markay u gudbayaan qaangaarnimada.

Sameynta heer isku beegis si loo taageero horumarka oo loo casriyeeyo nidaamka dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee mideysan, oo ka jira gobolka oo dhan

Iyadoo laga jawaabayo shuruudaha federaalka ee dhigaya lambarka 988, Oregon waa inay horumariso nidaam dhibaato oo adag, oo ay ku jiraan xarun wicitaan. In sidaas la sameeyo waxay u baahan doontaa tiknolojiyadda macluumaadka si loo horumariyo loona hawlgeliyo adeegga xarunta wicitaanka, waxayna u baahan doontaa in lala jaanqaado qeybaha kale ee sookoobistan cilmi-baaris, sida Taageerada Kalaguur ee Isku Dhafan.

Tani waxaa suurtogal ah inay yareyso farqiga ka jira caafimaadka iyo xaqsoor la'aanta caafimaadka iyadoo la abuurayo goob cusub oo ay ka helaan adeegyada dadka taariikh ahaan si buuxda loogu adeegin ee Oregon iyo in la abuuro adeeg beddel ah oo loogu talagalay dadka aan dooneynin inay wacaan 911 maxaa yeelay ma doonayaan inay ku lug lahaanshaha booliska. Tani waxaa suurtogal ah inay beddel u noqon karto bulshooyinka aan si buuxda loogu adeegin iyo bulshooyinka midabka leh.

Lambarka 988 iyo nidaamka dhibaatada adag wuxuu u noqon karaa albaab laga galo dadka wajahaya nooc dhibaatada caafimaadka maskaxda ah ama dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha. Waxay ku beegi kartaa dadka daryeelka degdega ah ee habboon waxayna ka weecinaysa iyaga waaxda gurmadka iyo nidaamka cadaaladda dembiyada.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Inkastoo istaraatiijiyaddan aysan si toos ah u saameynayn xubnaha barnaamijka OHP, haddana haddii la helo heer isku beegis, waxaa suurtogal ah kororka maalgashi iyo degdegsiimo si loo sameeyo nidaamka guurguura ee dhibaatada ee ka jira gobolka oo dhan.

Isticmaalka adeegyada ku saleysan asaaga iyo Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada

U oggolow asaaga baxnaanada in magdhow laga siiyo bixinta adeegyada ka baxsan qorshaha daaweynta dhaqameed (tus., kahor iyo kadib daaweynta) ama sida kale ka faa'iideystaan beddelka adeegyada si mar kale loogu oggolaado adeegyada ka baxsan nooca caafimaad ee caadiga ah ee wax looga qabto baahiyaha bulshada ee shakhsiyaadka, sida lagu sharraxay istaraatiijiyadda dhibaatada oo si dheeraad ah goor dambe u sharraxday taageerooyinka guriyeynta. Istaraatiijiyaddan waxaa lagu dhafi karaa istaraatiijiyadda Taageerada Kala-guur ee Isku Xiran.

Tani waxay abuuri kartaa in si loo siman yahay loo helo adeegyada iyo taageerooyinka iyadoo la ballaarinayo helitaanka asxaabta oo la isticmaalayo adeegyada bulsheed ee dadka ku dhiirrigelin kara inay helaan adeegyada caafimaad haddii loo baahdo ama laga fogaado haddii waxyaabaha kale ay macquul iyo waxtar leeyihiin. Dadka qabacilladaha isticmaalka mukhaadaraadka iyo cilladaha caafimaadka maskaxda ayaa si aan kala sooc lahayn u saameeyaan helida daryeelka caafimaadka, marka loo geeyo caqabadaha hortaagan daryeelka caafimaadka habdhaqanka.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Istaraatiijiyaddan waxay bixisaa qaabab dheeraad ah oo dadka lagaga qeybgelinayo daryeelka waxayna bixisaa taageero la kordhiyay inta lagu gudajiro soo kabashada hore taasoo u horseedi karta natiijooyin wanaagsan.

Mugga loo qabtay carruurta ku jirta Daryeelka Ilmaha

Carruurta ku jirta xabsiga daryeelka carruurta ee Oregon waxaa ka haysto caqabado helitaanka daryeelka saxda ah, waqtiga saxda ah ee loogu talagalay muddada saxda ah - gaar ahaan maadaama ay la xiriirto Adeegyada Ku Daaweynta Goobta ee Dhimirka (PRTS). Istaraatiijiyaddan waxay taageeri doontaa mugga loo qabtay carruurta ku jirta xabbiska Daryeelka Ilmaha ee loogu talagalay heerkan daryeel.

Waxay oggolaan doontaa boqolley ka mid ah mugga loogu talagalay PRTS si ay u helaan carruurta ku jirta Daryeelka Ilmaha ee buuxiyay baahida caafimaad ee lagama maarmaanka ah iyadoo la siinayo lacag loo dhigayo mugga la qabtay iyadoo loo marayo Medicaid si “sariirta loogu qabto” dad gaar ah oo ku jira xabsiga gobolka.

Carruurta ku jirta daryeelka ilmaha ayaa si aan kala sooc lahayn uga timaadda bulshooyinka midabka leh iyo qoysaska wajahaya cilladaha isticmaalka maandooriyaha oo ay saameysay saboolnimada.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Tani waxay u oggolaanaysaa daryeelka ilmaha iyo carruurta ku jirta daryeelka gobolka inay bilaabaan helitaanka adeegyada saxda ah, waqtiga saxda ah, muddada saxda ah, gaar ahaan marka ay la xiriirto carruurta u baahan PRTS.

Istaraatijiyadaha gaarka u ah qabiilada

OHA waxaa ka go'an inay la shaqeyso Sagaalka Qabiil ee Federaalku Aqoonsaday ee Oregon, iyo Barnaamijka Caafimaadka Hindida ee Magaalada (UIHP) si loo aqoonsado farsamooyinka gacanta looga geysanayo in la xaqiijiyo ujeeddooyinka daryeelka caafimaad ee qabiileed iyadoo la xushmeynayo dhaqammada ku saleysan dhaqanka qabiileed korna loo qaadayo xiriirka dawlad ka dowlad ee ka dhexeeya dalalka iyo gobolada madaxa-bannaan. Kulamada dhacay tan iyo maanta, qabaa'ilada waxay ku ogaadeen dhowr waxyaabood oo ahmiyad leh si looga fiirsado ka-dhaafida, oo ay ku jiraan:

- Oo ay ku jiraan qeexitaannada iyo caymiska dheeraadka ah ee loogu talagalay dhaqamada u gaarka ah qabiilada
- Dhimista culeyska maamul ee ku saabsan biilasha iyo dib-u-bixinta lacagaha
- Sii wadida barnaamijyada jira ee sida wanaagsan u shaqeeya

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Iska Kaashiga Wacyigelinta Bulshada community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.